

Helitaanka Goobaha Iskaashiga Tallaalka ee King County

La cusbooneysiyaay Abriil 1, 2021

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan goobahan ama sida loo samaysto ballan, tag [Helitaanka talaalka degmada King County - King County](#) ama wac Khadka Taleefoonka Caawinta COVID-19 ee Gobolka Washington: 1-800-525-0127 ama 1-888-856-5816 (kadibna riix #), Isniin: 6am – 10pm Talaado – Axad: 6am – 6pm. Wixii turjumaad luqad ah, dheh luqada aad doorbideyso marka khadka aad soo gasho.

Goobta Auburn

- Waxaa la heli karaa adeega ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah)
- Turjumaadaha ASL (Luuqada Qof dhagoola U miidaarida) iyo luqada ayaa laga heli karaa goobta.
- Haddii turjamaan taabasho ah loo baahan yahay, fadlan la xirii Seattle Deaf/Blind Service Center (Xarunta Adeegga Dhagoolayaasha/Indhoolayaasha Seattle): <http://seattledbsc.org> (waxa ku qoran luuqada Ingiriiska kaliy)

Goobta Kent

- Waxaa la heli karaa adeega ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah) iyo kursiga curyaamiintana waa la heli karaa.
- Turjumaadaha ASL (Luuqada Qof dhagoola U miidaarida) iyo luqada ayaa laga heli karaa goobta.
- Haddii turjamaan taabasho ah loo baahan yahay, fadlan la xirii Seattle Deaf/Blind Service Center (Xarunta Adeegga Dhagoolayaasha/Indhoolayaasha Seattle): <http://seattledbsc.org> (waxa ku qoran luuqada Ingiriiska kaliy)

Goobta Renton

- Dhamaan rugaha talaalka waxaa laga heli karaa adeega ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah) sidoo kale kuraasta curyaamiintana waa la heli karaa.
- Markaad timaaddo, Aaladaha Tarjumaadda Lagu qabto qaab masafo ee fiidiyowga ah (VRI) ayaa loo heli karaa luqadda dhegoole u miidaarida ama adeegyada tarjumaadda luqadda lagu hadlo.
- Haddii turjamaan taabasho ah loo baahan yahay, fadlan la xirii Seattle Deaf/Blind Service Center (Xarunta Adeegga Dhagoolayaasha/Indhoolayaasha Seattle): <http://seattledbsc.org> (waxa ku qoran luuqada Ingiriiska kaliy)

Goobta Redmond

- Markii aad wacdo goobta Redmond si aad ballan u hesho, waad codsan kartaa taageero dhanka luqadda ah.
- Goobtu waa mid si buuxda loo heli karo adeega ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah) shaqaaluhuna waxay u tababaran yihiin inay ku caawiyaan. Kuraasta curyaamiinta ayaa la heli karaa markii la codsado.
- Haddii aad isticmaasho baarkinka dhulka hostiisa, waxaad u baahan doontaa inaad masafo yar ku safarto wiish ku geynaya irrida rugta caafimaad. Ama, waxaa laga yaabaa in toos lagu keeno albaabka laga soo galo.
- Markaad timaaddo, taleefanka caafimaadka iyo tarjumaadda onlaynka ah ayaa lagu heli karaa in ka badan 200 oo luqadood, oo ay weheliyaan turjumaanada Isbaanishka, Mandarin, Hindiga, iyo ASL (Luuqada Qof dhagoola U miidaarida) oo goobta soo xaadira.
- Agab daabacan iyo calaamado ayaa laga heli karaa goobta iyadoo ku qoran luqado kala duwan.

- Haddii turjamaan taabasho ah loo baahan yahay, fadlan la xiriir Seattle Deaf/Blind Service Center (Xarunta Adeegga Dhagoolayaasha/Indhoolayaasha Seattle): <http://seattledbcs.org> (waxa ku qoran luuqada Ingiriiska kaliy)

Goobaha Rainier Beach & West Seattle

- Markaad timaaddo, labada goobba waxay leeyihiin wadooyin loo habeeyay dadka ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah) oo tagaya meelaha tallaalka lagu daboolaya.
- Haddii aadan awoodin inaad kasoo baxdo gaarigaaga, shaqaaluhu waa ay ku diiwaangelin karaan oo ay ku tallaali karaan intaad gaarigaaga ku jirto.
- Dhammaan goobaha waxay marin u leeyihiin Laynka tarjumaadda luqadda iyo tarjumaadda ASL (Luuqada Qof dhagoola U miidaarida) ee fiidiyowga ah.
- Haddii turjamaan taabasho ah loo baahan yahay, fadlan la xiriir Seattle Deaf/Blind Service Center (Xarunta Adeegga Dhagoolayaasha/Indhoolayaasha Seattle): <http://seattledbcs.org> (waxa ku qoran luuqada Ingiriiska kaliy)

Goobta Lumen Field, Seattle

- Dhamaan irdaha laga galo Field Event Center ayaa laga heli karaa ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah).
- Haddii aad ku timaadid gaari, iridda ugu weyn ee Helitaanka/ADA (Sharciga Dadka Mareekanka ah ee Naafanimada ah) waa tan ugu dhow Gareejka Baarkinka Lumen Field Event Center oo ku yaala 330 S Royal Brougham Way.
- Caawinta dhaqdhaqaaqa waxaa la heli karaa marka aad xarunta soo gasho; fadlan ka soo gal qadka ku calaamadeysan 'Line A' kaalmana waa lagu siin doonaa.
- Adeegyada luqadda waxaa laga heli karaa goobta in ka badan 200 oo luqadood; fadlan ka soo gal khadka ku calaamadeysan 'Line B' caawimaad xagga luqadda ahna waa lagu siin doonaa.
- Haddii turjamaan taabasho ah loo baahan yahay, fadlan la xiriir Seattle Deaf/Blind Service Center (Xarunta Adeegga Dhagoolayaasha/Indhoolayaasha Seattle): <http://seattledbcs.org> (waxa ku qoran luuqada Ingiriiska kaliy)